Qorshaha Weyn ee Beerta Nasashada ee SE 150th iyo Division

1 Meel lagu cayaaro "skate" (2-3 muuqaal leh)

2 Meel biyo lagu cayaaro leh

3 Meel kubadda kolayga loogu talagalay

4 Goob nasasho/cunto

5 Hoy nasasho/cunto

6 Goob lagu cayaaro

7 Meel deegaan dabiici ah leh

8 Beer faxalka ubaxa loogu talagalay oo jid la maro leh

9 Beer dadweyne (oo gaaraysa 1.2 acres)

10 Buur yar

11 Dhul caws ah oo leh meel kubadda cagta loogu talagalay

12 Goob eyda aan hogaanka 'leash' ku xirnayn loogu talagalay

13 Musqulo

14 Jid cusub oo laga talaabo

PORTLAND PARKS & RECREATION℠
Healthy Parks, Healthy Portland

Mayer/Reed

N 0 50' 100'

September 2017

Warbixinta Qorshaha Weyn ee Beerta Nasashada ee SE 150th iyo Division

Keenida Beeraha Cusub ee Nasashada la keenayo Koonfur-bari Portland

Beerta nasashada ee mustaqbalka laga samaynayso SE 150th & SE Division Street waxay dabooli doontaa baahida weyn ee loo qabo beeraha nasashada ee mid ka mid ah xaafadaha Portland ee dadka ugu badan ee kala duwan ku nool yihiin. Hantida qiyaasteedu tahay 7.5-acre, ee ay 2014-kii gadatay Beeraha Nasashada iyo Raaxada Portland (PP&R), waa goob si tartiib ah u socota, caws qariyay, oo ay ku wareegsan yihiin guryo qof kaliya iyo qoysas badan loogu talagalay, iyo meel si fiican looga arki karo Powell Butte. Dadka degaanka iyo dadka isticmaala beerta nasashada ee ku hadla Afka-Ruushka, Soomaaliga, Nepali iyo Ingiriisiga ayaa ka qayb qaatay nidaam naqshad lagu samaynayo oo loogu talagalay bulsho dhaqamo iyo luqad kala duwan leh. Naqshada beerta nasashada ee lagu taliyay waxay ka turjumaysaa dadaalka wada shaqayn ee la xiriira xaafadaha iyo kooxaha bulshada si loo abuuro meel soo dhaweyn leh oo leh oo ay ka socdaan hawlo loogu talagalay dadka da'kasta leh. Guud ahaan, waxaa jira xiiso weyn oo loo qabo beertan nasashada ee cusub iyo rabitaan xoog leh si loo dardar-geliyo nidaamka horumarka.

Beeraha La Beerayo iyo Ka Kor Marida Gaajada

Iskaashi gaar ah oo lala leeyahay Ka Kor Marida Gaajada "Outgrowing Hunger" ayaa keentay in beer dadweyne oo weyn laga sameeyo meel ku meel gaar ah oo ku taala goobta beerta nasashada, taasi goobta keenta dad maalin kasta soo booqda. Bulshadu waxay isla markiiba la qabsadeen beerta, iyada oo nolol u keentay goobta haddii kale noqon lahayd meel madhan iyada oo dhiirigelin siiyay kuwo mustaqbalka rajaynaya beer nasasho.

Dhismaha Bulshada La Adeegsanayo Naqshada Beerta Nasashada

PP&R waxay iskaashi la yeelatay dadka bulshada u adeega si la iskugu soo uruiryo talooyin dhab ah oo qiimo leh oo laga helo bulshooyinka cid matalaysaa aanay jirin, dakhligoodu hooseeyo, qoxootiga iyo muhaajirka ah ee ku nool degaanka.

Tilmaamaha:

- Barnaamijka "Party in the Park" wuxuu bilaabay nidaamka qorshe weyn oo la isticmaalayo kulan lala leeyahay dad luqad kala duwan leh iyada oo xubnaha bulshada ka tirsan lagu soo dhaweynayo goobta, si ay fikradahooga ku saabsan muuqaalada beerta nasashada iyo hawlaha dadka ula wadaagaan. Kuwo badan oo ka mid ah, tani waxay ahayd fursadii u horeysay ee kaga qayb qaataan qaabaynta magaaladooda.
- Guddiga tala bixinta bulshada, oo ka kooban shaqsiyaad matalaya ururada bulshada oo badan, ayaa bixiyay khibrad si loo hago naqshada beerta nasashada.
- Barnaamij xiriir oo u gaar ah dhaqanka oo la isticmaalayo kooxo la isku keenay oo talo dhiibanaya oo ay fududeeyeen Xiriiriyayaasha Adeegyada Ka qayb qaadashada Bulshada (CELs) ayaa xoojiyay ka qaybgalka. La shaqaynta hoggaamiyayaasha bulshadan iyo turjubaanada luqadda ayaa kordhiyay tayada naqshada beerta nasashada isla markaana xoojiyay xiriirada bulshada.

Aragtida Bulshada iyo Xiisaha

Qorshahan weyni wuxuu ka turjumayaa baahiyaha ay bulshada kala duwani u qabto hawlaha dhanka madadaalada sida ciyaarista kubadda cagta ama ku ciyaarista biyo qabow , iyada oo uu sidoo kale jawaab u yahay rabitaan xooga leh ee bulshadu u qabto meelo la iskugu yimaado oo loogu talagalay kooxaha iyo qoysaska.

- Naqshadu waxay abuuraysaa meel wadne u ah beerta nasashada, oo leh goob dad badani ku nastaan/wax ku cunaan iyo meel madadaalada loogu talagalay oo ku taala bartamaha meel u dhow beerta dadweynaha iyo goobta lagu cayaaro.
- Beerta dadweyne oo weyn iyo Meesha deyrka leh ee Ayda aan Hogaanku 'leash' ku Xirnayn ayaa ku dhejisan beerta nasashada, isla markaana waxay sanadka oo dhan keentaa dad maalin kasta soo booqda.
- Meel astaan ah oo laga gelayo Division Street waxay leedahay muuqaalka biyo xagaaga lagu cayaaro iyo dhisme furan oo loogu talagalay dhacdooyinka bulshada iyo barnaamijyada.